



Hagaajinta/Samaysashada Google Chromebook

*****Google Chromebook wuxuu u baahan yahay in lagu xiro shabakadda "SD_CO_LIBRARY" ee laanta si loo habeeyo looguna isticmaalo Moxee Hotspot *****




1. Daar Chromebook oo [Riix] Marti Ahaan u Gal (Browse as Guest) (haddii aanu shidmin ku xir adabtarka korantada)



2. Baraawsarka Google Chrome ayaa furmi doona, marka aad URL geliso baraawsarka waxa uu si toos ah ugu xirmi doona "SD_CO_LIBRARY" waxaad u baahan tahay inaad ogolaato Heshiiska Adeegga Internetka ee Degmada San Diego



3. [Riix] Badhanka Waan aqbalay Heshiiska Adeegga (I Accept the Service Agreement).




4. Kadib marka aad ogolaato heshiiska adeega, Sandiegocounty.gov ayaa furmi doona, waxaana laga yaabaa inaad hadda isticmaasho internetka. Tani waxay sidoo kale u oggolaan doontaa Chromebook-ga inuu si toos ah ugu xirmo Moxee Hotspot.

Markaad ku xirto internetka adigoo isticmaalaya Wi-Fi-ga SD_CO_LIBRARY, waxaad hadda ku xiri kartaa Moxee Hotspot.

Sida Aalad Shakhsiyeed Loogu Xiro Moxee Hotspot

"Google Chromebooks waxay si toos ah ugu xirmi doonaan Moxee Hotspot"




1. Daar Moxee Hotspot adigoo [Riixaya] badhanka "POWER"

2. [Riix] MENU laba jeer si aad u soo saarto "Macluumaadka 2.4G Wi-Fi"


3. [Riix] Badhanka Shiditaanka hal mar, oo Muqaalka LCD-ga ayaa bixin doona macluumaadka lagu galo Wi-Fi

4. Moxee Hotspot-kan [NAME] wuxuu noqon doonaa "COSD-LIB-MIFix_2.4G" baaswaadhkana wuxuu noqon doonaa "iloveSDCL!"




5. Kadib markaad aqoonsato Magaca & baaswaadhka Moxee Hotspot, qeybta settings-ka ee aaladaada [Riix] Wi-Fi oo DAAR/SHID, haddii aysan horeba u shidnayn/daarnay n. Dooro Meenuuga Shabakadda, dooro COSD-LIB-MIFix_2.4G

6. [Geli] Baaswaadhka "iloveSDCL!" iyo [guji] Ku biir (Join) (aaladaada hadda way ku xiran tahay)




Ku gelitaanka Akoonkaaga Google ee Gaarka ah


Kahor intaadan bilaabin hannaankan, xaqiiji in Chromebook-gu ku xiriirsan yahay intarneedka




1. Gal Chromebook-gaaga adiga oo gelinaya macluumaadkaaga Gmail-ka. Tusaale ahaan, Sample@gmail.com




2. [Geli] Baaswaadhka, ka dibna [guji] Xiga (Next)




3. [Riix] Aqbal oo sii wad, ama waxaad saari kartaa calaamadda hubinta si aad dib ugu eegto xulashooyinka Isku-xirka ka hor intaadan riixin (Next)



4. Dib u eeg Shuruudaha Adeegga Google Play, oo [riix] "More" ka dibna "Accept" si aad u sii wadato



5. Si aad uga shaqeysiiso Google Assistant iyo Hey Google! [Guji] badhanka "I agree". [Guji] badhanka "No thanks" si aad uga gudubto.



6. Wax walba waa diyaarsan yihiin! [Guji] badhanka "Get started"

Sida Loo Saaro Akoonka Google-ka ee Gaarka ah

